

Tilmaamaha iyo Xeeladaha Cusbooneysiinta KanCare

Ogeysiisyada cusbooneysiinta ayaa lagu soo diri doonaa boostada loona dirayaa keliya ciwaanka ku jira diiwaanka KanCare.

Haddii xogtaadu isbadashay, wac KanCare Clearinghouse (800-792-4884) ama shirkadaada caymiska Medicaid *tusaale, UnitedHealthcare, Aetna, ama Sunflower), ama adeegso chatbot ku yaala koonarka hoose ee midigta ee: www.kancare.ks.gov.

- **TILMAANTA:** Haddii aadan hadda haysan ciwaanka guriga, waxaad soo diri kartaa ciwaanka ehelkaaga ama saaxiib aad ku heli karto boostada.

Ogeysiisyada cusbooneysiinta ayaa lasoo diri doonaa ayadoo lagu saleynaayo taariikhda diiwaan gelinta ee KanCare.

Hawshaan cusbooneysiinta ayaa soconaysa sanadka oo dhan marka haddii aadan helin ogeysiiska cusbooneysiinta, waxaa laga yaabaa inaan waqtigaagii la gaarin wali. Waxaad la xiriiri kartaa KanCare Clearinghouse (800-792-4884) ama bixiyahaaga caymiska Medicaid si aad u ogaato bisha cusbooneysiintaada.

- **TILMAAN:** Waxaa jira **dookha fariin codeedka** ee Clearinghouse – fariin reebista ayaa yareysana wicitaannada lagusoo celchesho iyo waqtiyada sugitaanka ee dhaadheer.

Fiiri boostadaada si joogto ah iyo oo soo celi dukumiintigaaga cusbooneysiinta sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah. KanCare waa inay HESHAA dukumiintigaaga ugu danbayn 15^{ka} bisha loo mudeeyay in lagu keeno.

Tusaale: Haddii aad hesho ogeysiis bisha Juun, dukumiintigaaga waa in lagu ceshaa xafiiska KanCare ugu danbayn Luuliyo 15^{keeda}.

Haddii KanCare aysan helin foomkaaga ugu danbayn 15^{ka}, **waxaad lumin doontaa caymiskaaga dhammaadka bisha ayadoo aan laga eegayn u qalmidaada.** Haddii aad lumiso caymiskaaga, waxaad haysataa 90 maalmood si aad dib ugu soo gudbiso codsiga si aad u hesho caymiska bilihii lasoo dhaafay iyo magdhawga dhaqaale. Kharashaad kasta oo dhaqaale adiga ayaa jeebaaga ka dhiibaaya ilaa inta qarash celinta la ansixinaayo.

- **TILMAANTA:** Xaqiiji in dukumiintigaaga **LA SAXIIXO taariikhdana lagu qoro.** Foomamka aan la saxiixin ayaan laga shaqeyn doonin.
- **TILMAANTA:** waaxaa fiican inaad **soo dirto foomka aan dhamaystirnayn (laakiin saxiixan) si dhakhso leh** halkii aad sugi lahayd dhammaan xogta wada saxan. KanCare ayaa kula soo xiriiraaya si ay kaaga

codsadaan xogta xigta ee ay rabaan.

- **TILMAANTA:** Sabab la xiriirta dib u dhacyada boostada, fakis ku dirista dukumiintigaaga ayaa ah qaabka ugu fudud ee loo xaqiijiyo in lagu soo diray waqtigii saxda ahaa. Adeegyada fakiska ayaa laga heli karaa shaybaarada waxaana laga heli karaa xafiiska dhakhtarkaaga. Kadib markaad fakiska dirto, **hayso xaqiijintaada** lacala haddii wax dhacaan.
1-800-498-1255 (fakiska)